RapidRide H Line

COMING IN 2023

Somali | Soomaali

# King County Metro wuxuu bilaabay dhisidda Khadka H ee RapidRide

King County Metro, oo kaashanaya Waaxda Gaadiidka ee Seattle iyo Magaalada Burien, wuxuu ka shaqeynayaa hormarinta Metro Wadada Baska 120—mid ka mid ah 10 ugu mashquulka badan ee wadooyinkeena Khadka H ee RapidRide.

Metro wuxuu bilaabay dhisidda hormarrada badbaadada marinkoo dhan iyo sare u qaadista mustaqbalka RapidRide Boosteejada ama xeryaha baska ee Khadka H ee meelaha ku suntan RapidRide iyo waxyaalaha lagu sii nasto. Waxaan wargelin doonaa xaafadaha wadada, ganacsiyda, iyo hay'adaha bulshada maxaligaa inta lagu jiro dhisidda si iyaga loo wargeliyo marka iyo meesha shaqadu ka dhici doonto, iyo sidookale saameeynno la fisho.

## Maxaa la fishaa inta lagu jiro dhisidda?

- Saacadaha caadigaa ee dhisidda waa maalmaha shaqada, 7 a.m. ilaa 3:30 p.m., oy la jirto shaqo marmar ah oo habeen iyo maalmaha la nasto ah
- Xayiraado meel ku gaar ah oo gaari-dhigasho
- Xiritaanno leyn-wado iyo wado meel gasho oo marmar ah
- Tilmaan-bixiyeyaal haga taraafiga aagagga shaqada
- Jidada bedel oo loogu talagalay dadka lugeynaya, baaskiilka wada, iyo waxyaalaha wareegta
- Wadooyinka beddelkaa ee baska iyo goobaha basku istaago ee meel ku gaaraa ee loogu talagalay Wadada 120
- Xerada dhismaha iyo saameeynnada gaari-dhigashada u dhaw goobta dhisidda
- Xoogaa xiritaanno dariiq lugeyn, isgoys, iyo leyn-wado
- Saameeynnada caadigaa, sida sharqanta, busta iyo qashin, iyo dhaqdhaqaaq taraag







## Ku Xirnow

**Booqo boggeena khadka si aad ula socotid dhaqdhaqaaqa dhismaha oo isku qor warbixinnada dhismaha oo iimeel ah:**

**www.kingcounty.gov/rapidride/h**

Bilaabanaya 2023, Khadka H ee RapidRide, oo ku xiraya Burien iyo White Center Bartamaha Magaalada Seattle ayadoo la marayo xaafadda Delridge, wuxuu hormarin doonaa safarka waqtiyada, isku-halleynta, iyo xiriirrada basaska kale iyo tareynka Sound Transit's Link.

## Xeryaha la hormariyay

Xeryaha baska RapidRide waxay siiyaan dadka qaata waxyaalo lagu sii nasto iyo hab lagu safro oo joogto ah oo la isku halleyn karo iyo baska raac. Hormarrada waxaa ku jiri doona:

- Xeryo isku jira qiyaastii nus kiilomitir si loo dedejiyo waqtiyada safarka
- Meelo cusub, akhriyaal kaadhka ORCA, iftiimin, macluumaad safar isla-markaas ah, iyo dheeraad fariisin, iyo raacid albaabadoo dhan
- Xeryo si fudud looga soo geliyo ganacsiyada maxaligaa iyo meelaha kulamada bulshada

## Helitaan iyo badbaado la siyaadiyay

Hormarrada RapidRide waxay ka dhigi doonaan baska in loo lugeeyo oo la raaco wax fudud oo nabadgelyo ah. Hormarrada waxaa ku jiri doona:

- Seenyaalayaasha wado goynta iyo meelaha dadku wadada ka gooyaan ee cusub
- Dariiqyada lugta ee cusub, hagaajinta dariiqa lugta, iyo dalcadaha u hogaansan ADA

## Xawaare iyo isku-halleyn la hormariyay

Dadka raaca waxay ka fili karaan hormarrada RapidRide waqtiga safarku inuu yaraado. Adeeg dheeraad ah hormarrada waxaa ku jiri doona:

- Basas imaanshaha badiya—15-kii daqiiqaba maantoo dhan, maalin kasta iyo ugu yaraan 10-kii daqiiqaba inta lagu jiro waqtiyada mashquulka badan ee safarka
- Adeeg dheeri ah baa lagu dari doonaa habeenkii iyo maalmaha la nasto
- Leymanka baska iyo marinka ganacsiga (BAT) oo loogu talagalay basaska iyo gawaarida gelidda iyo ka-bixidda ganacsiyada
- Seenyaaleyaal basaska mudnaan siiya
- Horumarinno gooni u ah xeryaha baska

have a say

**WAXAAN DOONAYNAA IN AAN MAQALNO FIKRADDAADA!**

**Khadka Dhisidda:** 206-257-3079
rapidride@kingcounty.gov

Is qor si aad u heshid warbixinnada mashruuca:
**www.kingcounty.gov/rapidride/h**

Para solicitar esta información en Español, favor de llamar al 206-257-3079 o envíe un mensaje de correo electrónico a community.relations@kingcounty.gov

Si aad u weyddiisato inaad ku hesho macluumaadkan Af-Soomaali, fadlan wac 206-257-3079 ama iimayl u dir community.relations@kingcounty.gov

Để có các thông tin này bằng tiếng Việt, xin gọi số 206-257-3079 hoặc gửi điện thư đến community.relations@kingcounty.gov


206-257-3079번으로 전화하거나 community.relations@kingcounty.gov 로이메일을 보내시면 이정보를 한국어로 받으실수 있습니다

如果要索取本資訊的中文版，請致電 206-257-3079 或發電郵給 community.relations@kingcounty.gov

**Naqshad fikradeed xerada RapidRide**

1. **Hooy**
2. **Bir la isku tiirsho**
3. **Kursi**
4. **Haan qashin**
5. **Tiirka nalka dadka lugeynaya**
6. **Iftiin markii lagu dalbado batoon riixid**
7. **Tiirka farsamada**

Isbeddeli kara markasta.




King County METRO

Seattle Department of Transportation

The Levy to MOVE SEATTLE

Burien

# Su'aalaha Inta Badan La Iska Weydiiyo ee RapidRide H Line

### Maxay tahay RapidRide H Line?

RapidRide H Line, oo horay loo yaqaanay Route 120, waa mid kamid ah 10-keena wado ee ugu mashquulka badan. Waxa ay isku xirtaa xaafadaha Burien, White Center, iyo Galbeedka Seattle ilaa bartamaha magaalada hoose ee Seattle ee ku teedsan Waddada Saddexaad. RapidRide H Line waxa ay sidoo kale bixin doontaa iskuxirka baahida loo qabo ee wadooyinka kale ee basaska iyo Iskuxirka tareenka fudud.

### Sidee ayey wadada RapidRide H Line uga duwan tahay wadada Route 120?

Basaska RapidRide H Line marar badan ayay iman doonaan, waxay noqon doonaan kuwo la isku halleyn karo, wakhtiyo adeeg oo dheeraad ah ayaa lagu kordhin doonaa habbeenkii iyo maalmaha dhammaadka asbuuca. Boosteejooyinka basaska waxaa lagu soo kordhin doonaa meelo kor kadadan oo la fadhiisto, nalal, saacadaha sheega macluumaadka wakhtiga dhabta ee imaanshaha baska si warqabkaaga kor loogu qaado. Wadooyinka hareeraha lagu lugeeyo, meelaha dadku ay wadadu ka gudbaan, iyo calaamadaha taraafikada ayaa agagaarka boosteejooyinka loo hagaajin doonaa dadka lugeynaya, kuwa baskiilka ku socda, iyo kuwa uu xaddidan yahay dhaqdhaqaaqoodu. Intaa waxaa sii dheer, khadadka marinka ganacsiga iyo gaadiidka (BAT) oo cusub ayaa lagu soo kordhin doonaa si loo hagaajiyo wakhtiyada safarka ee gaadiidka loona siiyo marin wanaagsan oo ay darawaladu u maraan ganacsiga.

### Waa maxay saacadaha dhismaha iyo muddo intee le'eg ayuu dhismuhu socon doonaa?

Saacadaha shaqada ee caadiga ah ee mashruuca RapidRide H Line ayaa ah Isniinta ilaa Jimcaha, 7 a.m. ilaa 3:30 p.m., iyadoo wakhtiyada qaar la shaqeynayo habbeenki iyo maalmaha dhammaadka asbuuca. Inta badan dhismaha ayaa la filayaa inuu socdo illaa bisha Maarso 2023 iyadoo dhismaha qaar uu socon doono sanadka 2023 kadib.

### Ma la sii wadi doonaa gaaritaanka ganacsiyada inta dhismuhu socdo?

Waa la sii wadi doonaa gaaritaanka ganacsiyada inta dhismuhu socdo. Waxaanu la xariineynaa darisyada, ganacsatada, iyo ururada bulshada ee maxalliga ah kahor dhismaha agtooda laga sameynayo si aan ula wadaagno goorta iyo goobta wax laga dhisayo, iyo sidoo kale saameynta la filayo inuu keeno dhismaha.

### Maxay tahay sababta uu dhismihii hore dib ugu dhacay?

Dhismaha RapidRide H Line waxaa horay dib loogu dhigay sababo la xariira Shaqo joojinta shaqaalaha darawallada shubka ee gobolka oo dhan, arrimo la xariiro iskuxirka sahayda, iyo helitaanka agabka oo xaddidan. Booqo webseedkeena si aad uga akhriso sida King County ay u maareyneyso dib u dhacyada ay keeneen arrimaha la xariira saadka shubka dhismaha.

### Maxay tahay sababta goobo cusub dhismo loogu bilaabayo iyadoo goobihi kale weli la dhammeystirin?

Arrimaha la xariira iskuxirka saadka ayaa saameynaya mashruucyada dhismaha ee gobolka oo dhan, gaar ahaan helitaanka shubka dhismaha oo xaddidan ama aanan la saadaalin karin, ayaa keentay in shaqaaluhu isku miisaamaan shaqada ay qaban karaan iyo agabyada laheli karo si ay u sii wadaan shaqadaas. Si loo ilaaliyo jadwalka guud ee mashruuca, waxaan dhismo ka bilownay dhawr goobood oo cusub oo ay shaqaaluhu ku haystaan kheyraadka iyo agabkii ay ku dhammeystiri lahaayeen shaqada, iyadoo sidoo kalena la joojinaayo shaqada qaar ee ka socota goobaha kale, hadba sidi ay lagama maarmaan u noqoto. Shaqaaluhu waxay sii wadaan inay horumar ka sameeyaan shaqada ka socota dhammaan aagga mashruuca, waxaana rajeyneynaa inaan awoodno inaan ku soo gabagabeyno shaqada goobaha qaar ee dhammaan aagga mashruuca dhammaadka xagaagan.

### Xagee ka socdaa dhismaha hadda?

Halka shaqaaluhu ay dhismaha ka wadaan ayaa toddobaadba ka duwan toddobaadka kale. Wixi faahfaahin dheeraad ah oo kusaabsan goobaha ay shaqadu ka socoto, ka eeg qeybta "What's Happening Now (Waxa Hadda Socda)" ee webseedkeena mashruuca ama booqo boggeena si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Waxaad sidoo kale si aad u hesho warbixinada mashruuca iska diiwaangelin kartaa halkaan.

### Waa maxay shaqada la qaban doono bilaha jiilaalka?

Shaqaaluhu waxay diiradda saari doonaan rakibaadda hoyga, macdan qodista, shubida shamiitada, iyo muuqaalaynta dhulka bilaha jiilaalka. Wixii faahfaahin dheeraad ah ka eeg khariidadda dhismaha. Heerkulka hooseeya iyo roobka joogtada ah waxay u baahan doonaan in shaqada laamigu u wareegto sanadka soo socda marka heerkulku diiran soo noqdo. Goobaha shaqada ay hakad ku jirto, waxaan ilaalin doonaa qalabka, xoojinta koontaroolka taraafikada, waxaana dabooli doona godadka furan si loo hubiyo xaaladaha safarka ee badbaadada leh.